Baro Weriyaha Bulshada
Axmed Xasan Sh.Suufi
"Cawke"

Mareegta Farshaxan
Fu,aad Sh.Abuubaker
Oktoober,2009

Hordhac:

"*Runtii horta abuuri way iska jirtaa ,waxaadse jeceshahay aadna aaminsan tahay waad samaynaysaa.…".*

Axmed Xasan Cawke

Xilli ku beegnayd 1989kii, anigoo ku soo dhaw sarta Savoy Center ee ku taala magaalada Muqdisho ayaa wiil aanu saaxiib nahay kor dhawaaq iigu sheegay in gaadhiga hor yaala sarta uu la socday(watey) Axmed Xasan Cawke uuna dhinaca gudaha u dhaqaaqay,iswaydiintii halkuu galay iyo waxaa isku xigay annagoo ag taagan Axmed Xasan.Hase yeeshee muuqaalka ay indhaheygu arkayaan iyo mala-awaalkii maankayga dhex jibaaxayey ayaa isku kay qaban waayey oon nafta u sheegay malaha saaxiibkay Cawke kale ayuu sheegayaa.Afkiisa caano lagu qabay waxay dhaguhu maqleen codkiisii si degdeg ah baanay dheguhu ugu markhaati fureen indhihii ku maqnaa si ay sawir meelmara uga kaydsadaan dhacdadan hore looma arkaanka ah.

Maqalka codka Cawke ee dhagaha soo gaadhaya iyo muuqaalkiisa markay indhuhu qabtaan waxaa in badan oo bulshada Soomaliyeed ka mid ah muran ka dhex dhaliya humaaga uu maanku kuu sawirayo markaad codkiisa maqlayso oo aad uga duwan markaad indhaha qac ku siiso.Sidani waxay ku dhacday dad badan,waanan garowsadey waxay dadku sheegayeen.Hase yeeshee taasi hawada ayey ka baxdey kol haddii farsamada casriga ahi iminka suurto galinayso in maqal iyo muuqaalba si fudud la iskugu heli karo.

Axmed Xasan Sh.Suufi "Cawke" waa weriye caan ah, madasha uu joogana si qiimo iyo qurux leh uga muuqda.Wuxuu dabayaaqadii horaantii bishii Juun ee 2009 diyaariyey dood ugub ah oon hore loogu arag bulshada ku hadasha af-soomaaligu meeshay doonaanba ha degaanee.Marka laga hadlayo Cawke ahaan inuu hindise iyo hormayn cusub la yimaadaa kuma cusba, bulshaduna waa uga baratey,ee u tartamayaal jagada ugu sareysa dal oo su'aalo isku mid ah dhexda loo dhigay ayaa tilmaanteeda soocan leh. Waxaa runtii amaan leh saddexda tartame oo si hufan,horumar siyaasadeed iyo si caqli suubaniba ka muuqato uga qayb qaatey doodaa.Taasoo tilmaan fiican ka ah horumarka dhinaca siyaasada eey Somailand ku talaabsatey mudadii gaabneyd eey dhidibada u taageen dibudhiska dalka Somaliland.Waxaanna doodan lagala socday dhamaan mareegaha

internet-ka,wargeysyada, cod-baahiyayaasha, iyo Universal TV oo uu shaqaale ka yahay iminka.

Waxaa mareegaha,cod-baahiyayaasha, iyo TV-yada(fogaal aragyada) ku baxa afka Soomaaligu ay dhamaan jecel yihiin inuu Axmed Xasan Cawke xubin ka mid ah shaqaalahooga noqdo Cawke, waxaanay dareemaan gudcur iyo in gabal u dumay markuu u digo rogto mid kale, iyadoo ta uu ka hawlgalayaana muujiso farxad iyo raynrayn ay jiilaalka kaga baxaan kol hadduu Cawke iyaga garab taagan yahay lana daadihinayo barnaamijyadii ay wadeen oo bulsha weynta Soomaaliyeed dhegaha u sii sifaysnayaan.Imisaa dad joojiyey dhegaysiga ama daawashada warbaahin Cawke ka dhex baxey,imisaase ku laday bulshada uu codka Cawke soo jiitay kuna darey bahweyntooda?.

Warbixintaasi waxay inagu khasbaysaa inaynu u kuurgalno barashada shakhsigan Ilaahay hibada codkarnimo ugu deeqay.Nasiib wanaag bahda Mareegta Farshaxan ayaa u tafoxaydatey una banbaxdey inay raadraac ku samayso taariikh nololeedkii Axmed Xasan "Cawke",lana wadaagto bulshada ku hadasha af-soomaliga ee had iyo jeer u heelan inay waqti siiyaan ka gudashada xiisaha leh ee maqal iyo muuqaalba wariyahooga soocan. Bahda Mareegta Farshaxan waxay arintan fulinaysaa si ay Cawkena ugu sheegto isagoo nool in ummada uu had iyo jeer ku dadaalo raaligelintooda iyaguna og yihiin dadaalkiisa una mahadnaqayaan, bulshada uu raaligeliyana bal si qoto dheer u bartaan sooyaalkii Axmed Xasan "Cawke".

Geeridu waa lama huraanee,aadamaha aan ka soo jeedno ayaa dhaqan ka dhigtey inay qofku markay tii Illaahay soo qaabisho ku dadaalaan ka waramida wanaaga qofku galay waana sifo wanaagsan.Hase yeeshee waxaa ayaan daro ah in intuu qofku noolyahay aan la dareensiin halkuu bulshada kaga jiro.Sidaa darteed ayaa Mareegta Farshaxan oo had iyo jeer lagu baadisooco u heelanaanta raadraaca taariikhda, dhaqanka, iyo hidaha bulsha weynta Soomaliyeed gaar ahaan ta Somaliland ayaa u hub qaadatey inay Axmed Xasan "Cawke" la wadaagto dareenka bulshada u heelan maqalka codkiisa kuna soo hirta goobta warbaahinta uu kolba ka hawlgalo,isagana ku dhiirigalinaysa inuu sii kordhiyo dadaalka iyo hawlkarnimada uu u leeyahay warbaahinta .

"Ha laguu ilmeeyee,
Horto dhimo af maahee,
Eeggoo la noolyiyo,
Ifkaan kaaga baahanahay,
Wax yar oo aqoonsiya,
Oon aad u buurnayn,
Oo weliba eegeey,
Igu sii amaahoo,
Ictiraafka buuxee,
Aakhiro markaan tago,
Iilka igu sugaayiyo,
Ayaantaan xabaal galo,
Oohintaan mutaystiyo,
Akowntkayga laga jaro,"

Maxamed Xaashi "Gaarriye"

Sooyaalkii Axmed Xasan “Cawke”

Marxuum Sh.Suufi Cilmi oo aad ugu caan ah degaanka Soomaalidu degto gaar ahaan agagaarka Gabiley,ayaa deganaa magaalada Saylac oo aheyd xarunta hormoodka ganacsi ee geeska muddo dheer.

Mareegta Saaxil

Magaalada Saylac oo qoraalada qaar ku magacaabaan "Aualites" waxay leedahay taariikh aad u fog. 529 C.D. ayuu ka dhoofay boqorkii Xabashidu, markii uu u sii socday magaalada Cadan ee dalka Yaman. Magaalada Saylac waxaa soo booqday qoraagii caanka ahaa ee Ibn_batuutah 1330-kii, halkaasoo uu ku tilmaamay inay ahayd magaalo weyn xilligaa.

Qarnigii 16^{aad} waxay magaalada Saylac ahayd caasimaddii maamulkii caanka ahaa ee Awdal. Qoraalada laga hayo Saylac way farabadan yihiin,balse aan ku soo koobo,laba socdaal oo ay kusoo kala mareen nin la odhan jiray Johnston iyo ninkale oo la odhan jiray Richard Burton.

Richard iyo Johnston labaduba,waxay soo mareen sebenkii uu ka talinayay magaalada Saylac Sheekh Sharmaarke Ali Saalax oo magaalada ka ahaa guddoomiye muddo dheer. Labadaa ninba waxay ku tilmaameen magaalada Saylac inay ahayd magaalo weyn oo uu ka socday ganacsi aad u xoog badani.Ganacsigaasi kumuu ekayn xoolaha iyo badeecadaha kale ee la kala iibsado ee xataa, waxa magaalada laga dhoofin jiray dad la soo khasbay,oo loo iibgayn jiray Sayladaha carabta,dadkaasoo laga soo qab-qaban jiray badhtamaha Afrika. Xilligaa ay labadaa nin soo kala mareen waxay ahayd 1844-kii oo uu Johnston soo maray iyo 1854-kii oo uu Richard soo maray, isagoo xilligaa ku sii socday magaalada Herer.

Sh.Suufi (IHUN) wuxuu ugu wanqalay inankiisii Xasan , halka danaakiladii la deganayd magaalada Saylacna ay ugu ladheen Cawke oo ah eray af canfariga ka soo jeeda sheegayana midabka .

Bar kulanka Somaliland iyo Itoobiya waxaa ku taala degmo u qaybsan labase wadaagta magaca guud oo la yidhaa Wajaale(Tog-Wajaale),inkastoo dadka qaarkii ay ku sii tilmaansadaan qar Soomaali dhinaca Somaliland, halka ay qar xabashina ku tilmaamaan dhinaca Xabashida.

Xasan Sh.Suufi (IHUN) oo ah Axmed "Cawke" aabihii ayaa wuxuu isagu deganaa degmada Wajaale ee Gobolka Gabiley,waxaanu ka mid ahaa tobaneeyaha ugu hanti badan degaankaa,inkastoo dadka qaarkii ku tilmaamaan Wajaale ahaan inuu hormood isagu ka ahaa.Wuxuu Xasan (IHUN) lahaa guryo badan,dhoofina jiray xoolaha iyo hargaha. Waxaa magaalada Berbera uga wakiil ahaa nin la odhan jiray Sayid . Xasan waxaa u dhexday marwo Caasha Nuur .Waxaana aabo Xasan Sh. Suufi iyo hooyo Caasha Nuur Ilaahay ugu deeqay wiil iyo gabadh,halka ay wiilka ugu wanqaleen Axmed,gabadhana Canab.

Waxaa noqotay odhaah lama ilaawaana oo jiritaankeedu la jiil qaado fac kasto oo bulshada reer Somaliland ah halkudhaga laga hayo Xasan Sh.Suufi (IHUN) oo ahaa : "Waa reer jigjiga iyo wuu wanaagsan yahay kala daa ".

Waxaa tilmaan weyn aheyd magaalada Wajaale harta uu lahaa Xasan Sh.Suufi (IHUN) oo laba odhan jiray Harta Xasan Cawke.Kaynta ka sokayso Kalabaydh ayaa iyaduna aheyd meel lagu booqdo Sh.Suufi (IHUN).

Wuxuu Xasan inankiisii Axmed kaga darey barashada Quraanka isla degmada Wajaale, sidoo kale dugsigii hoosena isla halkaa.Hase yeeshee dugsigii dhexe waxaa Axmed loogu diray inuu ka galo degmada Cadaadley uuna ku dhameystay. Xili ku beegnayd 1971[kii] ayuu ka qalin jabiyey dugsigii sare ee Camuud –iminkana ah Jaamicada Camuud-ee gobolka Awdal.

Sidii caadada aheyd xiligaa waxaa safar dheer loogu bixi jiray ilaa magaalada Muqdisho si loo galo dugsigii xalane oo markaa la odhan jiray "Bootiko". Axmed markii uu safarkaa ku jiray ayaa saaxiibadii oo la socday ay dhex mareysay waydiimo ay kamid aheyd inuu qof waliba ka waramo waxaa uu jecel yahay inuu noqdo timaadada.Isagoon Axmed Xasan "Cawke" muujin hakad ayuu si ay ka muuqato inay tahay go'aan hore meel ugu guntanaa si kalsooni ku jirto u yidhi "waxaan jeclaan lahaa inaan noqdo weriye". Si fudud ayey u qaateen iyagoo saaxiibadiisii socdaalkaa la wadaagayey ay inta safarkaa lagu jiray dareemayeen inta jeer ee uu isku bilkeediyey inuu siday u waramayaan Wali Xaaji Cali iyo Yaasiin X. Ismaaciil oo kale u waramo keenana hab farshaxaneedkoogii xabeebtu ka aradnayd.

Markii ay dhameysteen dugsigii Xalane ayaa Axmed Xasan uu ka bilaabay shaqadiisa qaranka inuu macalin ka noqdo magaalada Berbera 1972-1973[kii].

Ka dib dhamaadkii xilkiisa shaqada qaranka ahaa ayuu u ambaabxey inuu shaqo tago oo aheyd sida xilliyadaa dhici jirtay inta badan.Gu'gii1973[kii] wuxuu shaqadiisii u horeysay ka bilaabay idaacada raadyow Muqdisho, waa siduu rabay Ilaahay ma u fududeeyey.Wuxuu muujyey firfircooni dheeraada,hawlkarnimo iyo si qumana u adeegsadey codka Ilaahay ugu deeqay ee xabeeb ka madhan.

Gu'ba gu riixee 1975[kii] ayuu Axmed ku tiriyaa inuu sheegay warkii ugu naxdinta badnaa, kuna tiriyo maalmihii ugu modoobaa ee hawlgalkiisa warbaahineed. Xilligan waxaa la dilay wadaadaadii diiday in hadalka Ilaahay (Quraanka) la badalo ee habaarqagihii Afweyne dil toogasho ah la beegsadey iyadoo uu xukunkana riday dhiigyacabkii Geele. Maalintaas ayuu Axmed Xasan "Cawke" ku qornaa sheegista warka oo uu in badan ka meeraystay,hase yeeshee qofkastaa sidaa si la mid ah ayuu uga meeraysanayey ooy u suurtogali wayday inuu ka baxsado sheegistaa warka maalintaa.

Xusuus:

23[dii] Janaayo 1975:

Tiro ah 10 Wadaad ayaa lagu xukumay dil toogasho ah iyadoo lagu toogtay Dugsiga Booliska 10:00kii subaxnimo, ayna daawasho ugu yimaadeen xubno ka socday Goloyaasha Dawladii habaarqabto & Ciidanka qaybihiisa kala duwan iyo Dhamaan G/Banadir .Waxaa dul heehaabayey oo la soo kiciyey labo Diyaaradood oo ah nooca dagaalka si Dadweynaha loo cabsi galiyo markii ay dulmaraayeen Xaafada Waaberi labadii Diyaaradood wey isku dhaceen Waxaana ku naf waayey 52 qof oo rayida.

1.Sheekh Axmed Sheekh Maxamed
2.Sheekh Cali Xasan Warsame
3.Sheekh Cabsiiye Diiriye
4.Sheekh Cusman Jaamac
5.Sheekh Maxamud Saciid Xersi
6.Sheekh Cali Jaamac Xersi
7.Sheekh Aadan Cali Xersi
8.Sheekh Yasiin Cilmi Cawil
9.Sheekh Axmed Liiban
10.Sheekh Muuse Yuusuf

(U duceeya wadaadada u istaagay u gargaarka Quraanka Eebe,
waxaanay mudan yihiin ku dayasho ….)

1977[kii] waxaa dhacey dagaalkii Soomaalida iyo xabashida, tani waxay noqotey inuu Axmed Xasan noqdo codka kaliya ee ummada Soomaliyeed ku doogsato,iyagoo sugi jiray kuna dadaali jiray inaanay dhaafin faalada ka danbaysa warka ee uu daadihinayo Axmed Xasan "Cawke" . Xiligani waa xiligii magaca Cawke ku dhex faafay bulsho weynta Soomaliyeed meel kastooy degto ,dhegahooduna ay la qabsadeen codkani saafiga ah si deganna ugu nasanaya dhegaha .Mar la waydiiyey inuu ka waramo xiliyadii ugu wanaagsaneyd ee uu xasuustana wuxuu ku jawaabey: " wax aad lo xiisayn jiray beri

waxaa jiray 1977[kii] dagaalkii Soomaaliya iyo Itoobiya oo aan faalooyinka akhriyi jiray oo aheyd qof aan is leeyahay hadduu dhaafo maalintaa wax weyn baa dhaafay ,runtiina aan aad ugu soo baxey ayaa runtii la jeclaa …..wararka markaan idaacad ka sheego ugu xiisaha badnayd ayey aheyd ummaduna ka sinayd …..".

1980[dii] wuxuu noqday weriyaha gaarka ah ee madaweynihii dawladii uu hogaanka u hayey habaarqabe Ina Siyaad, inkastoo uu fogaal aragii iyo warbaahintii kalena ka wadey barnaamijyada uu wadi jiray ilaa iyo burburkii dawladii habaarqabto .

Dagaaladii dibu xoreynta dalka ka dib, wuxuu u baqoolay oo uu qaxooti ku noqday magaalada Kampala ee wadanka Ugandha.

1995[kii] waxaa jago shaqo ka banaanaatey idaacada iminka ku hawlgasha baahinta beenta iyo colaada ee markaa ku xardhaneyd BBC uuna hogaanka u hayey weriye sare Maxamed Cabdilaahi.Xiligaa waxaa adkaa in qofku si fudud ugu soo biiro iyadoo la dhawri jiray sumcada idaacada, lana eegayo aqoonta, kartida, iyo dadaalka qofka la shaqaaleynayo.Waxaana joogay shaqaale aqoontooda iyo tayadooduba sareysa kana madhan sifooyinka maanta lagu yaqaan shaqaalaha ka hawlgala cod-baahiyaha beenta iyo baafinta colaada(BBC).Waxaa jagadaa codsadey tiro shaqaale gaadhaya 300 oo qof, is reebreeb la sameeyey ka dib waxaa wareegii koowaad isu soo taagey ilaa dhawr iyo sodon qof. Waxaa xiligaa joogay idaacada weriyayaasha loo tiriyo tayo,xilqaadnimo,iyo aqoon warbaahineedba oo ay ka mid ahaayeen :

Maxamed Cabdilaahi Xasan (ahaa Gudoomiyaha qaybta Af-Soomaliga)
Maxamuud Cabdi Cali "Ducaale"
Maxamuud Sheekh Axmed Dalmar
Aadan Nuux Dhuule (oo iminka ku kooban uun inuu wararka sheego marmar)
Yoonis Cali Nuur (oo iminka aad moodo inuu dibada ka yahay kuna kooban tababarida)
Cabdilaahi Xaaji (oo iminka ka muquurtay wareysiyadii looga bartay)
Siciid Faarax Maxamuud
Siciid Cali Muuse
Shamsa Baybook
Iwm.

Waxaa u xil saarnaa xiligaa xulashada weriyaha loo baahan yahay Maxamed Cabdilaahi, Jeff Philips (oo sheegi jiray arimaha caalamka) iyo Ann Dent (oo ka socotay xafiiska shaqo gaynta-Human Resource-). Si aan u fahano qaabka xulashada oon sahlaneyn bal aynu wax iskaga tilmaano sidii uu u dhacey xiligaa .

Waxaa dhamaan laga qaadey imtixaan qoraal ah oo ka kooban :
-War af Soomaali ah oo loo af celinayo af Ingiriisi.
-War af ingiriisi ah oo loo af celinayo af Soomaali.

-Waydiimo ku saabsan aqoonta shakhsiga ee arimaha caalamka iyo iyagoo la tusay sawiro dad caan ka ah ayna qorayeen magaca qofka sida : Sawiradii Negasso Gidada,Sadata Ogata,Hibo Maxamed iwm .

Axmed xasan "Cawke"wuxuu ka mid ahaa dhawr qof oo ka ka gudbay wareegan una gudbay wareegii labaad,waxaanu ku maray imtixaankii magaalada Kampala ee cariga Ugandha.Muddo ka dibna loo sheegay inuu noqday qofkii loo doortay shaqadaa weriyenimada
Wuxuu ku sugnaa kana mid ahaa shaqaalaha warbaahintaa ilaa laga gaadho bishii June 23, 2008.Isagoo la waydiiyey sababta uu uga tageyna wuxuu yidhi : "" Nin weyn iyo islaan umuliso ahiba siday wax u ogyihiin uma sheegaan" ayuu ku jawaabay "Kolay nin weyn baan ahayoo ee wixii jiraba waa la arki ",waxaanu sii raaciyey "Kolay hibada Ilaahay ku siiyey kol hadaanad soo bandhigi Karin in la digo rogto ayaa haboon ,oo waliba waa laga baxey inay xuurto dadka ku haysato idaacada BBc-du".

Waxay u aheyd maalin murugo leh idaacada beenta iyo baahinta colaada(BBC) oo dib u halacsatey shaqaalaha u hadhey si mug weyna uga dhex muuqdeen kuwii aqoon iyo tayadaba ka aradnaa laguna soo qoray oodwadaag iyo naas nuujin darteed .

Amiin Caamir wuxuu Cartoon-kiisa ku muujiyay Siciid Cali Muusse oo noqonaya Weriyaha ugu dambeeya ee la tilmaami karo, kuna haray BBC Somali oo la hadlaya Cawke oo sii socdo, kuna leh"Cawkoow garbaad joogtaa. Raadkii Saaxiibkeynii ku soco marka aad tagto,iga warsug anigana goordhaw".

Mareegaha Hadhwanaagnews/Somalilandhorta /Gabiley Net

September 23. 2007

Qoraal ruuga Cali Cumar Xasan ayya si fiican u tilmaamay kana hadlay ka tagida Axmed Xasan "Cawke" iyo raadkay leedahay ayaa wuxuu lahaa : "Taneey(bbc-radio) Cawke-na kaa caroow !!! Ka tagida Axmed Xasan Cawke ka wareegay BBC-du waxay i soo xasuusisay, hadal murtiyeed uu reebay nin gabayaa wayn ah, oo la yidhaa Aw-Siyaad, una dhashay degaanka Gabiiley, mar uu sida igu maqal ah maqaaxi uu ku lahaa magaalada Kala-baydh(deg,gabiley), inta dadkii uu u furtay maqaaxida jiilaal adigi helay, gugiina ka tabiyay ay ka hayaameen, oo dabadeed uu aad ugu busaaradsadsaday, arkayna inaan waxba dhawaanahan soo naaso cadayn. ayuu inta uu gu-i ka qaaday ee uu ka dhaqaaqay maqaaxidii oo furan yidhi, hadal murti ah oo hada dadku inta badan markay meel ka quustaan ee ay ka tagayaan adeegsadaan, hadalkaasi oo ahaa " taneey Aw-Aiyaad-na kaa socooy", sidii baa uu aw-siyaad kaga tagay Kalabaydh iyo dalkaba oo uu ku galay Afrikada bari iyo carabaha, inaga oo og in ninka maqaaxida shidaa aanu isagu inta badan hayaamin, hadana waxa Aw-siyaad kaxeeyay waxa aynu garan karanaa inuu wax culus ahaa !!!!".

Cali Xasan oo ka warmaya xidhiidhka sheekadaa iyo digorogashada Axmed Xasan "Cawke" ka dhexeeya wuxuu yidhi: "Waxan hadaba sheekadan Aw-Siyaad uga socdaa, Axmed Xasan Cawke oo ah sida aynu ka wada war hayno, hibada Ilaahay uu siiyay ee wax sheega iyo tabintaba ah ka sokow, nin bashaashi ah, ka adag shaqadiisa, gole-nuure ah, dadka aan ka qaloon iyagana qalayn, cod soo jidasho leh lagu galaday, dulqaad badan, badan, badan oo weliba aan Anigu wax ka saaro, biyahii afku-rubadlaha ahaa ee Xamar, inay dulqaadkiisa sii siyaadiyeen. Waxa maanta inuu sidii Aw-Siyaad yidhaa, Taneey (bbc-daay) Cawke-na kaa caroow! Waa wax wayn oo uu maarayn kari waayay, oo aad ka dhadhansan karto, hadalkiisii uu ku bilaabay tixdii murtida ahayd ee caanka ahayd, ee uu yidhi" Nin wayn baan ahoo warami maayee, waxaan arkay waaba la ogaan".

Xilligaa ka dib oo ku beegnayd dabayaaqadii: 29-September-2007 wuxuu u digo rogtay warbaahin codeedka laga furay dalka Maraykanak kumna caana maasha Idaacada codka Amerika .Wuxuu daadihiyey barnaamijyo badan , qaarna isagaaba udub dhexaadka u taagay sida barnaamijka Caweyska Sabtida oo soo jiitay bulsho tiro badan .

Wuxuu ku sugnaa halkaa ilaa muddo ku beegan dabayaaqadii bishii April 2008.Sida ka cad mudadan oo aad u yar hase yeeshee isaga iyo wariyaha mudan ka waramid ee Cabdisalaan Hereri waxay dhageystayaasha ku raaligaliyeen barnaamijyo tayo leh iyo cod turxaan ka madhan oo soo jiitay dhamaan dadweynaha ku hadla af-soomaaliga .Sida dhacday markuu ka tagey Idaacadii BBC-da , kamuu waramin sababtuu uga digorogtay waxaana la odhan karaa inay haeyd mid gaar ah waayo warbaahintani wali dhaguhu way u hanqal taagaan , halka ta BBC-da ay yaraadeen dadkii dhageysan jiray oo xataa marmarka qaarkood la is waydiin karo ma warbaahin ku hadasha af soomalibaa tayada li'ida afka lagag hadlo darted iyo waayo aragnimo li'ida shaqaalaha ka shaqeeya dhawaanahan darteed.

Bishii April dabayaaqadeedii 2008 wuxuu ku biiray fogaal arag cusub oo la furay kuna hanaqaadey magaca "Raad TV International" lagana hirgaliyey dalka Ingiriiska, kumuuse nagaan halkaas. Ruug caddaaga warbaahinta Somaaliyeed caanka ka ee ku biiraya taleefishinka cusub waxaa kamid ah Maxamud Sh. Dalmar iyo Maxamud Ducaale oo labaduba hore BBC-da uga shaqayn jiray.

Waxaa aad la iskugu raacsan yahay inuu yahay wariye furfuran , dhaguhu jecel yihiin , aad ugu xeeldheer shaqadiisa una fuliya sida ugu haboon isagoon jecel markuu hawsha qabanayo .Waa tusaale fiican oo u taala wariyayaasha cusub ,si ay uga badbaadaan wuxuu ku tilmaamay "jaantaa rogan" ama hebelba waa wariyee adna wariye noqo.

Axmed Xasan Cawke wuxuu leeyahay xaas , caruur dhawr ah isagoo waliba Ilaahay ku manaystay inuu awoowna noqdo isagoo nool .Ilaahay ha u kordhiyo hana ka dhigo kuwo heyr qaba .
Wuxuu ku sugan yahay iminka weriye Axmed Xasan "Cawke" magaalada Hargeysa , noqdayna isku shaqeeyey ah weriye madaxbanaan -freelance journalist-.

Run Weheshiga:

Runta oo aad looga didaa waa tilmaan ay ku suntan yihiin dad badani,mararka qaarkood haba ahaato in loo fuliyo raaligalinta dadka ku xeeran qofka ka gabanaya runta. Wuxuu Axmed Xasan nasiib u helay inuu aqoon u yeesho dhamaan xubnaha kala duwan ee bulshada.Hase yeeshee markuu ka waramayo waxay ku kala fiican yihiin kama gabado inuu siduu u arko wax u tilmaamo haba ku ahaado kaliyee.

Axmed Xasan "Cawke" mar la waydiiyey aragtidiisa ku aadan suxufiyiinta Soomaaliyeed ee wakhtiyadan danbe aadka u batay ayaa waxa uu walaac ka muujiyey waxa uu ugu yeedhey jaantaa roganta ka taagan warfaafinta Somalida, waxaanu tilmaamay in qarankii Soomaaliyeed markii uu burburey askarigii Alifle ahaa waxa uu haatan yahay Gaaashaanle sare, sidoo kale Saxaafaddiina sidaas ayay noqotey .Hase yeeshee waan ku faraxsanahay buu yidhi: " iney wariyeyaasha Somaliyeed bataan haddii ay aqoontii warfaafineed xanbaarsanyihiin".

Cawke mar la waydiiyey aragtidiisa ku aaddan saxafiyiinta Soomaaliyeed ee wakhtiyadan danbe aadka u batay ayaa waxa uu walaac ka muujiyey waxa uu ugu yeedhey (jaantaa roganta)…"Hase yeeshee waan ku faraxsanahay iney wariyeyaasha Somaliyeed bataan haddii ay aqoontii warfaafineed xanbaarsanyihiin" buu yidhi.

Wariye Axmed xasan "Cawke" waxaa aad loogu yaqaanaa inaanu ka baydhbaydhin tilmaamida sida uu wax u arko iyo sheegista sida uu jecel yahay .Mar la kala dooransiiyey dhawr dad sidan buu wax u sheegay :

"Wariye warbixin akhriya waxaan ugu jeclaan jirey Idris Xasan Diiriye " Cawke oo u warramayey Universal TV.

Isagoo sii wata hadalkiisa wuxuu yidhi : "Halka Siciid Cali Muusena looga hadhey barnaamijyada cayaaraha".

Cawke waxa kale oo uu diiradda saarey habka ugu wanaagsan ee warbixin loo akhriyi karo oo uu ku tilmaamey xaaladda u dhexeysa degdeg keena in wariyaha la fahmi waayo iyo aayar-luud keeni kara in lagu caajiso, waxa kale oo uu xaqiijiyey in uu wariyuhu mid ka khibrad badan kaga dayan karo hab akhriska iyo usluubta war dejinta haseyeeshee ay qalad tahay inuu codkiisa koobiyeysto".

Hogotusaaleynta Bulshada :

Ardeyda /Dhalinta :

Dabayaaqadii bishii April 2009kii Axmed Xasan "Cawke" isagoo ka hadlayey xaflad loo sameeyay qalin jabinta 150 Arday, oo muddo laba sanadood ah luuqadaha Ingiriisida, Carabiga, xisaabaadka iyo Kombuyuutarka ka baranayay dugsiga gaarka loo leeyahay Al-Khayr ee magaalada Hargeysa ayaa ardeydaa ku dhiirigaliyey inay mar walba ogaadaan qiimaha iyo milgada uu waalidku leeyahay ,mudana in had iyo jeer loo jajabnaado waxaanu yidhi : "Da'daan ahay waad aragtaan aniga hooyaday ayaa nool, fasaxayga wadanka iyada ayaan u imaadaa, saaka ayaa u dambeysayoo waxay lahayd anigoo da'daas ah "Hooyo maalmahan rag waaweyn ayaad raacdaaye, oo habeenadan anigoo soo jeedana ma timaadide Hooyo hore u soo hoyo". Waxaanay igu tidhi xaggee baad ku kalahaysaa waxaan ugu jawaabay meel xagaas Hargeysa ah, waxaanay tidhi Ilaahayoow ku soo nabad celi, Aniguna iyadii ayaan ilaalinayaa oo aan is leeyahay kolba rog, iyaduna aniga ayay i leedahay habeenkii toloow kii yaraa waa kan fuuf-fuufta hayeen gam'i waayaye maxaa helay oo uu la seexan waayay waa ninkayga intaas leeg ee awoowga ah, kuwaan dhalay kuwii ay sii dhaleen ayaa jooga iyadiibaa ayeeyo saddexaad ah."

Isagoo maalintaa hadalkiisa sii wata wuxuu si tilmaaman oo hufan u sheegay xilka inaga saran waalidka oo u baahan in aad loogu feejignaado loona heelanaado fulintiisa, waxaanu yidhi : "Hooyadu ciyaar ma aha waalidkuna ciyaar ma aha, ciddii ku barbaarisaana ciyaar ma aha. Akhlaaqda ayaana ka kow ah. Annagu barigii aanu yar yarayn qofka dadka caaya waa la necbaa".

Wariyayaasha Cusub :

Cawke mar la waydiiyey aragtidiisa ku aaddan saxafiyiinta Soomaaliyeed ee wakhtiyadan danbe aadka u batay ayaa waxa uu walaac ka muujiyey waxa uu ugu yeedhey (jaantaa roganta) kana taagan warfaafinta Afka Somaliga ku hadasha , isagoo xusay in qarankii Soomaaliyeed markii uu burburey askarigii Alifle ahaa uu haatan yahay Gaaashaanle sare, sidoo kale Saxaafaddiina ay sidaas noqotey.Haseyeeshee waxuu xusay inuu ku faraxsan yahay iney wariyeyaasha Afka Soomaliga ku hadlaa bataan **haddii ay aqoontii warfaafineed xanbaarsanyihiin**.

.

Siyaasiyiinta Guud ahaan:

Waxaa inta badan dhacda siyaasiyiinta oon is dhageysan in ay hadaladooda dhacdhac badan laga arko siiba markay xil u ordayaan ama ay siyaasi kale rabaan inay muujiyaan galadadoodiis .Waxaa dhacdo hadaladaa in laga dhex helo gefaf haboonayd in laga dhawrsado , Axmed Xasan “Cawke” ayaan ka gaban inuu dareenkiisa arintaa ku aadan ka waramo waxaanu yidhi :“ "Hadda waxaad arkaysaa cayda waa la iskugu faanaaba, awalna waa laga durki jiray. Imika waxa lagu odhanayaa hadda waa nin weyn oo TV-yada isa soo taagaya wuu ku dhilay Anigu dhilniinka awal wax kale ayaan u haystoo, Arabikhi la dhilo uun baan arki jiraye, hadal buu ku dhilay illayn wuu ku eryay weeyaan. Waxa lagu odhanayaa ma arkaysay siduu xisbigii ugu qaad qaaday”.

Mar kale isagoo ka waramaya siday siyaasiyiintu u muujiyaan dareenkooga ku aadan ka la tartamaya ama ay ka soo horjeedaan ayuu isagoo ka biyo diidan qaabkey wax u wadaan yidhi: “Waa nin weyn oo Tv-yada isa soo taagay oo caytamaya, siduu berri madax iigu noqon karaa. Qof wax caayay madax maba noqon karo waa akhlaaqiyaad ilaahayna wuu neceb yahay. Waxaad doonayso si fiican baa loo sheegtaa waxaan Ardayeey idinkula dardaarmayaa akhlaaqda ilaaliya oo dhawrsanaanta ilaaliya”.

Mar kale isagoo tilmaamaya aflagaadada iyo af xumadu inaanay aheyn tilmaan wanaagsan ,haboonayna in qofkaa la doorto oo madax laga dhigto kol hadduu sifooyin aan haboonayn wato ,umaddana aanu meel wanaagsan u wadi doonin ,waxaanu lahaa isagoo arintan inoo faahfaahinaya : “Hadda waxaad arkaysaa cayda waa la iskugu faanaaba, awalna waa laga durki jiray. Imika waxa lagu odhanayaa hadda waa nin weyn oo TV-yada isa soo taagaya wuu ku dhilay Anigu dhilniinka awal wax kale ayaan u haystoo, Arabikhi la dhilo uun baan arki jiraye, hadal buu ku dhilay illayn wuu ku eryay weeyaan. Waxaa lagu odhanayaa ma arkaysay siduu xisbigii ugu qaad qaaday. Waa nin weyn oo TV-yada isa soo taagay oo caytamaya, siduu berri madax iigu noqon karaa. Qof wax caayay madax maba noqon karo waa akhlaaqiyaad ilaahayna wuu neceb yahay. Waxaad doonayso si fiican baa loo sheegtaa waxaan Ardayeey idinkula dardaarmayaa akhlaaqda ilaaliya oo dhawrsanaanta ilaaliya”.

Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa “Af xumo nabadna way kaa fogaysaa,colaadna waxba kaagama tarto”.

Maamulada wadanka Soomaaliya :

Waxaa wax laga murugoodo ah dhibta iyo hagardaamada ka taagan wadanka Soomaliya (Italian Somaliland) .Waa ayaandaro weyn oo ku dhacday in laba kasta oo heshiis ku ah inay xukuumadaha la soo dhoofiyey ka hor yimaadan, markuu midkood koro kusiga ay bilaabaan dagaal iyo colaad hor leh , halka dadweynaha ay ku dhacdo dhibaatadu siiba kuwa dega degaanada xamar iyo agagaarkeeda . Weriye Axed Xasan “Cawke” isagoo dareenkaa naxariiseed bulshada la qaba ayuu la hadlay kooxaha isagoo u tilmaamay in

dhinacyada Xamar isku hayauu ugu baaqayo in ay hubka iska dhigaan oo ay is afgarad wax walba ku dhameeyaan una naxariistaan sida uu sheegey shacabka dhibaataysan.

Milicsiga Xilliyo mudan:

1977 Xilligii uu ummada qalbifgeeda degay

1995 ku biiray BBC-da waa xiligay tayo ,sumcad iyo aqoonba laheydeee.

2002 Bishii Maarso waxaa magaalo madaxda Somaliland ee Hargeysa laga furay Mawjad FM ah oo ah tii ugu horraysay ee ku shaqaysa tamarta cadceeda, lagana dhegaysan doono barnaamijyada BBC-da, ee Ingiriisiga, Carabiga iyo Soomaaliga ayaa si rasmi ah looga furay magaalada Hargeysa Jimcihii. waxaana furitaankii mawjadaa oo si tijaabo ah u sii shaqaynaysay in muddo ah lagu maamuusay xaflad ballaadhan oo ay soo qaban-qaabisay BBC-du, oo habeenkii Sabtidu soo galaysay ka dhacday Hotel Maansoor.Waxaana ka soo qayb galay Madaxweyne Cigaal (IHUN), badi xubnaha Xukuumaddiisa, Guddoomiyaha Guurtida, Sh. Ibraahim Sh. Yuusuf(IHUN), xubno kale oo Golayaasha Baarlamaanka ka tirsan, saxaafada Somaliland, siyaasiyiinta mucaaridka , soo saare sare, Yoonis Cali Nuur, madaxa qaybta BBC-da ee Afrika iyo Bariga Dhexe, Mr. Barry Langring,.Waxaa kaloo madashaa ka muuqday Axmed Xasan Cawke Iyo Shaadiya Maxamed Rooble oo halkaa si toos ah uga xidhiidhinayey dhamaan barnaamijyada idaacada ee habeenimadaa warkii mooyee. Xafladdani waxay ahayd tii ugu ballaadhnayd ee BBC-du ku qabato dhulka Soomaalidu degto, inta la xasuusan yahay

2007 September ku biiray VOA

2008 April ku biiray RaadTV International

Falcelinta Dhegaystayaashiisa :

Dhamaan dadka daneeya aadna ula socda Axmed Xasan Cawke

Raadyoow Maqaloocshe:
Raadyow Ma Qaloocshe, A. A. Garas.
Halkani waa Raadyow Ma Qaloocshe oo aydun uga barateen inuu wararka dunida idinka dibiriyo, laakiin akhyaartiisa indhaha buurbuuranow maanta wuxuu idin huluuqsiinayaa Gabay geedkaa le'eg. Gabaygaasi waa ereyadii Asli Internet (Abwaan Cali Carab):

Cayn-na maaha BBC-dii
Codadka dheerayd'e,
Ciduun baa is magacowday
Bay weli la ciirraane,
Cabdille xasankii laga gudbay

Dib u cusbeeyeene,
Cilad raagtay bay soo fadheen
Sida carruureede,
Inuu Cawke uu dumar na baray
Caawa yaa u tebiya.

-Weriye Ahmed Hassan Cawke oo ah Weriyaha ugu sheekada,kaftanka iyo hal abuurka badan BBC Somali ,codkiisa aad loo xiiseeyo oo inta badan ka qosliya dhageeysta yaasha laguna xasuusto daadihinta barnaamijyada arimaha bulshada

-Cali Cumar Xasan.:

Cawke waxan xasuusin lahaa Isbaaro meel la dhigto bbc-du uguma horayne, waxa ka horaysay halkii dooxii Tog-wajaale ee aad garanayso, marka roobku da-o ee Togu soo rogmado, waa kuwii Dibjirka magaaladu intay Tiirarka girgidaha dumay soo gurtaan Biriij(bridge) ka samyn jiray ee dadka labada Daamood iskaga talaabaya lacagta ka qaadi jiray, qofka bixin waayaana Biyaha dhex-mari jiray, malaha waxa la gaadhay marka, xiligii Tiirar la samaysan lahaa, oo aan uga socdo Axmed Xasan Cawke iyo raga kale ee la midka ah ee ka soo jeeda Somaliland oo aan odhan lahaa **waar HOOY Fadhigaa fadhi kale ha looga noqdo, kolay dooxu wuu soo rogmanayaaye Tiirarka ka leh ahaada bay ila tahay, Idaacad ha loo sameeyo dadka, inta kolba cid marti loo ahaanayo**!!!!!!.

Raadraac:

-Taariikh ku saabsan magaalooyinka Saylac, Berbera iyo Sheekh
by Sayid Maxamed Yusuf "Dhegey"

-Mareegaha:

Hadhwannagnews.com, Gabiley.net, Saylac.com , Oodweyneews.com.....

-Qolka kaydka ee mareegta Farshaxan.

-wargeyska Haatuf

-Fogaal araga “TV Universal”

Mareegta Farshaxan
Fu,aad Sh.Abuubaker
Oktoober,2009

Copyright ©2003-2008 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.